

Baayoobsi "Biopsy"

Baayoobsi waa qaaliin yar oo looga saaraayo qayb ka mid ah hilibka jirka goobta la tuhunsan yahay ama la quseeynaayo. Waxaa jiraa noocyo fara badan ee baayoobsiga naaska.



Image: National Cancer Institute; Linda Bartlett, Photographer

- **Cirbada baayoobsiga "Needle biopsy"** waa qaabka ugu yar ee duleelinta jeexitaanka ugu sahlan. Waxaana lagu sameeyn karaa xafiiska dhakhtarka. Natijada way diyaarinta way kala duwan tahay 24-48 saac. Cirbada baayoobsiga waa ka saarida qayb ka mid ah burada oo la dareemaayo. Dhakhtarka qaliinka, dhakhtarka kansarka daaweyo ama

dhakhtarka raajiyada waxay isticmaalaan cirbada dhaxda ka duleesho si ay dibada ugu soo qaadaano ashyaada burada si loogu baaro weyneeyaha "microscope". Mararka qaarkood goorka burada aanan la dareeymeenin laakiin lagu arkay maamogarafi "mammography", farsamo casri ah oo lagu hogaaminaayo baayoobsi. Cirbada dhaxda ka duleesho waxaa lagu mudayaa burada. Maamogarafi, ultarasoondi "ultrasound" ama MRI waxay cawinayaa in ay ku hagaan cirbada si toos ah goobta burada. Xiliga cirbada baayoobsi, unugyada waxaa lagu soo qaadayaa cirbada dhaxdeeda. Cirbada afkeeda ugu dambeeyo waxay leedahay jilbaab cirbada ku hayneeso goobta ilaa oo ka dhamaanaayo qaliinka. Raajiyada "X-rays" waxaa la hubinayaa goobta aan caadiga aheen in ee isku mid yihiin halka la suraayo cirbada qaliinka.

- **Dhex ugu saarida cirbada baayoobsi waa heerka hadda lagu daryeelo.** Waa mid u eg cirbada baayoobsi, dhex uga saarida cirbada baayoobsi waa qaab yar, waxaana lagu sameeyn karaa xafiiska dhakhtarka. Natijada way diyaarinta way kala duwan tahay 24-48 saac. Dhakhtarka qaliinka, dhakhtarka kansarka daaweyo ama dhakhtarka raajiyada waxay ka saarayaan qaybaha faraha badan ee burada. Dhex uga saarida cirbada baayoobsi waxa lagu ogaanayaa akhbaaro ka fiican cirbada baayoobsi ka helitaanka unugyada kansarak ku dhax jiro unugyada caadiga ah. Bir yar ayaa la dhigayaa naaska si loo calaameeyo goobta baayoobsi. Haddii baayoobsi oo cadeeyo kansarka, waxaana loo baahan yahay qaliinka dheeraad ah, waa in ka dib la dhigaa bir si ay u cawinaayo dhakhtarka qaliinka u helilahaa isla goobtii hore ee naaska.

Cirbada baayoobsi iyo dhex uga saarida cirbada baayoobsi ma aysan laha khatarta ku faafida kansarka. Waxaa jira oo ay leeyihiin galayn (ku daboolan ama daah) oo ka daafacayso in cirbada "daadiso" unugyada kansarka. Qaabkaan waa mid nabadgalyo leh mana qaybinaayo kansarka mana keenaayo in oo unuigyada kansarka oo faafiyo ama ku koro. Nasiib-darro, cirbada baayoobsi iyo dhex uga saarida cirbada baayoobsi waxay khatar u tahay keenida natijjo caadi ah inkastoo

oo jiro kansarka halkaas. Sababtaan awgeed, waxaa suurtagal ah cirbada in ay markastab aysan soo qaban unugyada kansarka.

- **Dilaacinta (jarista) baayoobsi** wuxuu aad ugu ek yahay qaliinka caadiga ah. Waxaana laga saarayaa qayb yar oo hilib ah si loo baaro. Dilaacinta baayoobsi waxaa la sameeyaa goorta cirbada baayoobsi aysan keenin jawaab cad ama haddii burada ay aad u weyn tahay si sahah ahna looga saari Karin. Sida cirbada baayoobsi, dilaacinta baayoobsi waxay khatar u tahay keenida natiijo caadi ah inkastoo oo jiro kansarka halkaas.



Image: National Cancer Institute;
Linda Bartlett, Photographer

- **Gooynta (u jarista dibada) baayoobsi** waxaa kaloo lagu magacaabaa **lumbektomi "Lumpectomy"**. Waxaa laysku dayayaa in la saaro dhamaan burada la tuhansan naaska. Tani waxay hubinaysaa in la aburo baarista ogaashaha cudurka (kansar ama kansar la'aan) iyadoo aysan jirin natiijo qalad ah.

Labada jarista iyo u jarista dibada baayoobsi waxaa lagu sameeyn karaa rugta caafimaadka ama hosbitaalka iyadoo dukaan-socodka joogayn habeen. Daawada kabaabinta ayaa loo isticmaalayaa goobta baayoobsi.